



# Tarbiyada Ilmaha Zamanka Tiknoolajiyada

In kasto oo uu iPad-ku yahay aalad waxbarsho oo awood leh, hadana **waxaa muhiim ah in ay walidiinta hubiyaan** in guriga loogu adeegsado si munaasab ah. Waalidiinta waxay **Leeyihiin go'aanka kama dambaysta ah** ee saacadaha uu ilmahoodu

isticmaalo iPadka. Hoss waxaa ku xusan fikarado ku saabsan qaabka ay qoysaska u bari karaan in ay ilmahooda mustaqbalka noqdaan kuwa tiknoolajiyada u adeegsado si mas'uulnimo ah

## Shuruucda Ku-adeegsiga iPad-ka Guriga.

Ilmahaaga u samee shuruuc ku saabsan adeegsiga iPad-ka ee guriga:

- Ipad-ku waa in **ugu horeyn lagu dhameeyo shaqada iskuulka** inta uusan ardaygu u adeegsan internetka, ciyaar ama dhagaysiga heesaha
- **Had iyo jeer eeg iPad-ka** ilmahaaga iyo shaqadooda iskuulka
- Si aad ula socotid adeegsiga iPad-ka, **ilmahaagu haku isticmaalo iPad-ka goob aad ka arki kartid** sida kushiinka ama fadhiga.
- Si aad uga hor-tagtid in uu ilmahu adeegsado iPad-ka asagoo aysan cidna arkayn, **iPad-ka bayterigiisa habeenkii ku buuxi** qolkaaga jiifkaaga
- Hadii uu cunugaaga raaci waayo shuruucda aad u dajisay, waxaad xaq u leedahay **in aad dhintid ama xadidid saacadaha uu haysto iPad-ka**

## Talooyin iyo Macluumaad Loogu Talo Galay Waalidiinta

Barta **Common Sense Media** waxay qoysasku ka heli karaan talooyin ku saabsan qaabka ay u hubin karaan in ilmahooda, ay si aamin iyo mas'uulnimo leh internet-ka ugu adeegsan lahaayeen. booqo barta: [goo.gl/8SdPYk](http://goo.gl/8SdPYk) si aad u heshid xog dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha hoos ku xusasn:

- Qaabka loo bedelo **privacy settings** iyo talooyin ku saabsan amniga internetka
- U adeegsida **miidiyaha bulshada** (Social Media) si mas'uulnimo ah

- Qaabka lagu wajaho **qalalaasaha miidiyaha lagu dhex fuliyo**
- Qaanuunka **kormeerida saacadaha uu ilamaha shaashada hor fadhiyo** iyo sidoo kale qaabka loo sameeyo jadwal ku haboon da'da ilmaha.
- **Baraha waxbarshada** ee imaha yaryar
- Maaraynta qaabka uu ilmahu u adeegsado **telefoonka gacanta**
- **Saxiixa Heshiiska Qoyska.** Heshiiska waxaa weheliya qodobbo dhawr ah oo lagu hagi karo wada-hadalka ilmaha iyo waalidka ee ku saabsan qaabka haboon ee loo adeegsado tiknoolajiyada: <http://bit.ly/csagree>

### Caawimaad Cilad Farsamo

Hadii aad u baahan tahay caawimaad cilad farsamo wac **Khadka AppleCare ee hoos ku qora; ardayda waxay u baahan yihiin PIN code:**

**Telefoon: 1- 800-919-2775**

PIN: Ardayda waxay ka heli karaan PIN-ka iPad-ka warqada iPad-ka gadaal kaga dhegan ee uu ku qoran yahay PIN # .

6 am - 8 pm Central Time; Mon.-Fri.

8 am - 8 pm Central Time; Sat./Sun.

Wixii faah faahin dheeraad ah fiiri **Buugga Tasmada iPad-ka iyo Macluumaadka Waalidka:**

[www.spps.org/personalizedlearning](http://www.spps.org/personalizedlearning)

## Xadididda Internet-ka Guriga

Internet-ka iskuulka si toos ah ayaa looga celiyaa macluumaadka aanan haboonayn. Hase yeeshee, ardayda waxay gali karaan website kasto **marka ay aaladaha ku isticmaalayaan guriga** ama meelaha bulshada. Qoysaska haysta khad wireless ah waxay isticmaalka internetka ee ilmahooda ku xadidi karaan in ay soo **rogtaan sofwear khaas ah oo loogu talo galay reebbida galida shabakadaha internet-ka ee aanan haboonayn**.

- Fur barta **OpenDNS Home** iyo **Family Shield** oo aad lacag la'aan ka soo rogan kartid barta: [www.opendns.com](http://www.opendns.com)
- Sidoo kale barmaamijka **SafeEyes** ayaad ka gadan kartaa meelo badan; internet-ka ka raadi "SafeEyes" si aad ugu heshid qiimo munaasab ah
- Barmaamijka **NetNanny** ayaad ka gadan kartaa barta [www.netnanny.com](http://www.netnanny.com)
- **Shirkadaha telefontada iyo kuwa adeegyada sida kebalka** ayaad iyana ka heli kartaa xalka xadida internetka guriga. Ka ogoow shirkadahaas in ay hayaan adeegyadaasi

## Waxyaabaha ku Keedsan iPad-ka adiga khaas kuuma aha.

Maadaama uu iPad-ku yahay hanti ay degmadu leedahay, shaqaalaha degmada waxay ogaan karaan website-yada iPad-ka laga galay, sawirrada iyo wixii macluumaad oo kale. Ardayda waxaa laga rabaa in ay furaan iPad-ka hadii ay shaqaalaha degmada sidaas ka codsadaan.

## Waxyaabo Asaasi ah oo ku Saabsan iPad-ka

Xafiiska Personalized Learning waxaa laga heli karaa talooyin ku saabsan isticmaalka iPad-ka:

[www.spps.org/personalizedlearning](http://www.spps.org/personalizedlearning)

## Daryeelka Shashada iPad-ka

- **Ku nadiifi shaashada iPad-ka maro jilicsan sida** sida shukumaanka maacuunta lagu qalajiya
  - **Marna ha u isticmaalin tan daaqadhaha lagu nadiifiyo**, kiimikada guryaha lagu nadiifiyo, ammonia, alcohol ama waxyaabaha alcohol - ku salaysan, Waxay meesha ka saari karaan daaha muraayada iPadka gaarka ah/ama xagtin gaarsiin kartaa shaashadda
  - **Sidoo kale, ha isticmaalin hawada la buufiyo** si aad u nadiifiso duleelada (yar ee furan ee iPadka halkaas oo ay fiilooyinka ku jiraan)
- **Ha ku tiirsan shaashada iPad-ka** hana dul-saarin waxyaabo culus
- **iPad-ka ha u dhowayn waxyaabaha shubmo** hana kula qaadanin iPad-ka boorsada garabka iyo tan buugaagta.
- **Shaashada iPad-ka ha u isticmaalin shay caarad leh** sida qalin qori mise qalin kaleba.
- **iPad-ka ha ooga tagin meel uu heer-kulkeedu** ka sareeyo 95 F ama meel **qaabowgeedu** ka hooseeya 32 F
- **iPad-ka ka ilaali biyo** ama qoyaan

## Hadii uu iPad-ku Lumo, La xado ama Dhaawac gaaro

Qeybta Adeegyada Tiknoolajiyada ee Degmada ka wac: 651-603-4357

Lambarkan wac si aad ugu war-galisid iPad lumay ama la xaday. Hadiise iPad dhaawac soo gaaro ama uusan shaqaynaynin ayna tahay xili ka baxsan saacadaha iskuulka, ardayda waa in ay sugaan ilaa inta ay iskuulka kaga laabanayaan si loogu hagaajiyo.